Erziehungsdirektion des Kantons Bern

Amt für Kindergarten, Volksschule und Beratung

Direction de l'instruction publique du canton de Berne

Office de l'enseignement préscolaire et obligatoire, du conseil et de l'orientation

Xanaanada Caruurta iyo Dugsiga Hoose/Dhexe ee Gobolka Bern

Warbixin (waxyigelin) ku aaddan Waalidka



Somali

Ereyo horudhac u ah waxbarashada iyo barbaarinta soona jeedinaayo Gudoomiyaha waxbarashada iyo barbaarinta.

Waaalidka sharafta mudan.

Sannadka ugu horeeya ee caruurta tagayaan xanaanada ama iskuulka waa qeyb aad muhiim u ah nolosha ilmaha. Caruurta marka ay da,daan jiraan waxay horeyba u dhexgalaan aduun cusub Ardada kale ee ay isku fasalka yihiin wiilal iyo gabdho waxay nolosheeda ka ciyaartaa qeyb weyn.

Aniga shaqsi ahaan waxa ay muhiimadeyda tahay in uu Cunugaas farax san yahay iyo xirrirka uu la leeyahay Macalimiinta iyo Waalidka oo kalsoonida iskuulka u leh. Xirrika wanaagsan oo uu u dhaxeeyo waalida iyo isuulka kaas oo uu ku wajahan mustaqbalka ayaa saldhig u ah Caruurta hormarkooda waxbarasheed. Isla wada shaqeynta noocaas ah waa arin Qalbiga igu taa (waa muhiimad ugu sareysa).

Bernhard Pulver, Gudoomiyaha waxbarashada iyo Barbaarinta

Ka waalid ahaan waxaad door weyn ka ciyaari kartaa waxbarashada caruurtaada iyo mustaqbalka halka ay ku dambeyn doonaan, buugaan yar waxaan kuugu diyaariney warbixino kooban oo kaa caawiya sidaad u haleeli lahayd tubta toosan iyo weliba hababka waxbarasho ama manaahijta sanadlaha ah ee gobolka Bern.

Waxaad kaloo aad ka heleysaa Su aalahan soo socda Jawaabtooda

- Sidee bay u shaqeeyaan xanaanada caruurta iyo Dugsiga Hoose/Dhexe?

- Maxaa laga sugayaa ama filayaa waalidka?

- Maxaan sameyn karaa ama laygaga baahanyahay in aan sameeyo ka waalid ahaan in ay caruurteyda isku kalsoonaadaan ama si fiican wax ugu bartaan iskuulka?

Maamulayaasha iyo macalimiintuba waxay diyaar kuula yihiin wax alle wixii faafaahin ah ee ku saabsan waxbarashada. Fadlan booqo barteena internetka ee cinwaankeedu yahay www.erz.be.ch.
Oo ah barta internetka ee degmada iyo iskuulka ee caruurta wax ka bartan.

Waxaan idiin rajeyneynaa adinka iyo caruurtiinaba guul hanoqoto xanaanada caruurta ama iskuulka.

Bernhard Pulver
Gudoomiyaha waxbarashada iyo Barbaarinta ee Gobolka Bern

Tusmada Buuga

1 Waxyaalaha muhiimka ah oo la soo koobay. 3
Guud ahaan. 3
Sanad-dugsiyeedka iyo fasaxyada sanadka. 3
Jadwalka ama (manaahijta) waxbarashada. 4
Iskuulka maalintii oo dhan. 4
Shaqo Guri. 4
Natiijada sanadlaha ah(Qiimeyn). 4
Ka habsaamid ama ka maqnaansho sabab iyo sabab la, aan. 5
Maadooyinka caadiga ah ee iskuulka ka sokow waxaa diyaar loola yahay waxbarasho guud (maadooyin dheeri ah) waqtiga aan xisad lahayn caruurta ama iskuulka laga soo faxaso. 5
Caafimaadka. 5

2 Xanaanada caruurta iyo Dugsiga hoose/Dhexe. 7
Ujeedada iyo isku dubaridka (Qabanqaabin). 7
Xanaanada caruurta. 7
Dugsiga hoose (fasalka 1-6) 7
Ka gudbida dugsiga hoose iyo (u gudbida) gelintaanka dugsiga dhexe. 8
Dugsiga dhexe waa (fasalka 7-9). 8
Dhalinyarada iyo caruuraha cusub ee hadda soo degaya magaalada ama Gobolka. 9

3 Ka dib Dugsiga hoose/dhexe. 10
Fursado waxbarasho. 10
Barashada mihnadaha kala duwan. 10
Dugsi sare. 10
Xal meel dhexe ah. 10
Warbixino dheeraad ah. 11

4 Waalidka iyo iskuulka. 12
Wada shaqeynta ka dhexeysa waalidka iyo iskuulka. 12
Isdhaafsashada warbixinada waalidka iyo macalinka. 12
Tarjumaan. 12
Go, aanada muhiimka ah. 12
Gacan ku siin ama kutaakuleyn. 13

5 Duruufaha waaweyn (adag) ee iskuulka xagiisa ah ee hadba caruurtaada la soo gudboonaada. 14
Xalinta dhibaatada jirta ama sida loo wajahayo ama loogu baxaaayo. 14
Ka hortagidda mashaakilaadka ama dhibaatooyinka xaga aqlaakhda ah. 14

6 Dhibaatooyinka culculus ee xaga barbaarinta. 15
Talosiin ku aadan tarbiyadda ama barbaarinta ubadka, taas oo ay bixinayaan khubaro. 15

7 Waalidka sida uu qeyblibaax ugu qaadan karo ku najaxidda iskuulka. 16
Tusi iskuulka in aad daneyneysid waxbarashada caruurtaada. 16
Ku dhiiri geli kuna caawi ilmaha iskuulka. 16
Afka ama luqada iyo adiga khibrada aad u leedahay way caawineysaa caruurta. 16
Isticmaalka aaladaha cusub. 16

8 Erey bixin. 18

Warbixin

Gobolka Bern wuxuu leeyahay labo qeybood qeyb loogu hadlo afka-jarmalka iyo qeyb loogu hadlo afka-faransiiska. Kala duwanaashaha afafka dartiis ayey ukala duwantahay waxbarashada iyo weliba fasaxyada. Ereyada muhiimka ah oo af-jarmal ah ama faransiis ah waxaa lagu qoray khad cagaaran weliba afka-faransiiska waxaa u dheer in la calaamadeeyey.

1 Waxyaalaha muhiimka ah oo la soo koobay.

Guud ahaan.

Allgemeines / *Généralités*

- Iskuulka khasabka ah wuxuu soconayaa 9 sanadood. Dugsiga hoose ilmaha wuxuu ku bilaabayaa marka da,diisu tahay 6 jir. Sidaa daraadeed ilmaha ka hor dugsiga hoose wuxuu ka soo bilaabayaa Xanaanada caruurta oo 2 sano ah. Dugsiga hoose/dhexe ka dib oo ah wajib ardaydu waxay bartan farsamo ama xirfad shaqo ah oo socota labo ila afar sano. Haddi kale waxay maran ardaydu skulka layiraho “Mittelschule”.

	Dugsiga sare **Sekundarstufe II / *Degré secondaire II*** Barasho mihnad (Shaqo) ama Dugsi sare	2 - 4 sano
Dugsiga Hoose/Dhexe **Volksschule / *Ecole obligatoire***	**Dugsiga Dhexe** **Sekundarstufe I / *Degré secondaire I*** Qasabka – Jadwalka waxay u kala baxayaan 2-3 darajada waxbarasho – U diyaarinta kala doorashada shaqooyinka	3 sano
	Dugsiga Hoose **Primarstufe / *Degré primaire*** Qasab in caruurta 6 sano iskuulka lagu geeyo - Kala xulida caruurta inta lagu jiro fasalka 5-6: Kala shaandheynta (galida) Dugsiga Dhexe caruurta ayadoo loo eegaayo heerka waxbarashadiisa.	6 sano
	Xanaanada Caruurta **Kindergarten / *Ecole enfantine*** Ilhama waxey ku bilaaban marka ay 4 Sano dhafaan ama ay 5 jir yihiin Laqa bilaabo 2013 Xanaanada Caruurta waa Qasab	1 - 2 sano

- Ilmo walba iyo Dhalinyartaba waxey xaq u lee yihiin iney dhigtaan ama tagaan Xanaanada Caruurta iyo iskoolka Lacag la, aan ay ka tagayaan Meesha ay dagan yihiin. Degmada waxey Ardayda oo dhan siineysa Qalaba waxbarashada Lacag la, aan.

- Gabdhaha iyo wiilasha waxay isla dhiganayaan isku fasal casharkana si isku mid ah bay u qaadanayaan, ujeedada ka dambeysana waa in ay waxbarasho isku mid ah helaan.

- Xanaanada caruurta iyo iskuulada dowladda waxay ka madaxbanaan yihiin diin oo dhan taas oo micneheedu tahay iskuulka waxaa wada dhigta caruur qoys islaam ah ka soo jeeda, ku kirishtiyaan ka soo jeeda, iyo kuwo kaloo badan Sidaa daraadeed iskuulku waa dhexdhexaad si aan kuwana loo soo dhoweysan kuwana loo diin takoorin. Laakiin Bulsho weynta kirishtanka ah ee u dhalatey wadanka waxay leeyihiin ciido diintooda ah sida (Chrismaska ama Nataalaha) ama ay ku tilmaamaan dhalashadii nebi Ciise caleyhi salaam, iskuulada waa fasax (wadanka oo dhan xataa shaqaalaha waa fasax) markaa caruurta aan kirishtanka ahayna waa fasax oo iskuulku wuu xiranyahay oo iyaga iyo waalidkoodaba waa fasax.

- Iskuulka dowladda iska leh waxaa barbar socda waxaa jira iskuulo gaar loo leeyahay, hadaad rabto caruurtaada in aad geysato waxaad u baahantahay in aad ogolaansho ka hesho. Gudoomiyaha u qaabilsan Gobolka xaga waxbarashada iyo (barbaarinta) xanaanooyinka caruurta, waana lacag iskuulka gaarka loo leeyahay, haddii aad dooneysid waa in aad lacagta iska bixin kartaa.

- Caruurta curyaamiinta ah ha noqoto xag jir ama maskaxiyan, waxay xaq u leeyihiin in ay xanaanada caruurta iyo iskuulka (Dugsi Hoose/Dhexe) dhigtaan ama iskuulo iyaga u gaar ah. Haddii aad u baahantahay warbixin dheeri ah sida iskuulada u gaar ah curyaamiinta iyo weliba kaalmooyinka u gaarka ah ee ay xaqa u leeyihiin. Xataa ilmaha da,doodu ka yartahay 4 sano waxaad la xiriirtaa xafiiska degmadaada u qaabilsan la talinta ama booqo barta internetka ee cinwaankeedu yahay www.erz.be.ch/erziehungsberatung

Sanad-dugsiyeedka iyo fasaxyada sanadka.

Schuljahr und Schulferien / *Année scolaire et vacances*

Sanad- dugsiyeedka wuxuu bilowdaa bartamaha bisha Agoost wuxuuna dhamaadaa horaanta bisha Luulyo. Caruurta sanadkii waxay iskuulka tagaan 38 usbuuc ama 39 usbuuc. Fasaxyada waxaa loo qeybiyey sanadka oo dhan.

Fasaxa Deyrta: waa bisha Sebtembar iyo oktober 3 usbuuc (Qeybaha afka faransiiska loogu hadlo waa 2 usbuuc)

Fasaxa jiilaalka (Qaboobaha): waa bisha Dezember iyo janaayo waana 2 usbuuc

Fasaxa-isboortiga: waa 1 usbuuc

Fasaxa gu,ga: waa bisha April waana 2 usbuuc

Fasaxa xagaaga (Kuleylaha): waa bilaha Luulyo iyo Agoost 5 usbuuc (Meelaha loogu hadlo afka faransiiska waa 6 usbuuc).

Waqtiyada fasaxa, ama iskuulada xiranyihiin ama ciidaha waxaad ka heleysaa ayadoo la soo daabacay xafiiska degmada aad degantahay.

Jadwalka ama (manaahijta) waxbarashada.
Stundenplan / *Horaires*

Casharada waxay baxayaan inta u dhexeysa isniinta ilaa jimcaha. Halkii xiso waxay soconaysaa 45 daqiiqo. Gelinka hore waxaa la bixinayaa ugu yaraan 4 xiso oo waqtigooda bilow ilaa dhamaad degsan. Gelinka dambase waa kala duwanyihiin sidaa maalmaha u kala duwanyihiin ugu badnaan waa 4 xiso ugu yaraan 2 xiso. Hadba waxay ku xirantahay fasalka waana 1 mar ilaa 4 mar gelinka dambe waa fasax iskuulka. Tusaale ahaan ardada dhigata dugsiga hoose maalinta arbacada gelinka dambe waa fasax. Saacadaha ama jadwalka ilmahaaga waxaa bixiya iskuulka.

Ka Waalid ahaan Waajib ku saaran waa in ilmahaga waqtiga loogu tala galey in ay Fasalka yimaadaan, Sidaa oo kale waxaa Mas, uuliyad kaa saaran inaad la socoto marka ay iskuulka ay soo aadayaan iyo marka kasoo laa banayaanba.

Fiiri: caruurta maqnaashahooda iskuulka iyo xanuunkooda (boga 5) iyo waaalidka iyo iskuulka (boga 12).

Iskuulka maalintii oo dhan.
Tagesschule / *Ecole à journée continue*

Xanaanada ama iskuulka ka hor ama ka dib, haddii aad u baahato ama u baahantahay in **Caruurtaada weli lagaa hayo** degmada waxay diyaarkuula tahay saacado dheeri ah Waxaana badanaa caruurta iskuulka ka dib ama xanaanada ka dib lagu hayaa Dugsiga Hoose/dhexe dhexdiisa.

Iskuulka maalintii oo dhan ah wuxuu u qaybsamaa sidan soo socota:

- Aroortii hore inta aan la bilaabin xanaanada ama iskuulka.
- Waqtiga qadada iyo weliba qado.
- Gelinka dambe casharada ka dib ama malimaha gelinka dambe aysan jirin casharo

Waqtiga qadada iyo gelinka dambe weliba waxaa la socda in caruurta laga caawiyo shaqo guri. Waalidka isagaa u madax banaan ama doorankara hadba waqtiga dheeriga ah ee uu caruurtiisa la rabo, iskuulkaan oo maalintii oo dhan ah waa lacag, lacagtana waxay ku xirantahay hadba qofka musharkiisa ama lacagta soo gasha ama hantida ay haystaan ama qoyska weeynaantiisa.

Wixii intaa ka badan oo warbixin ah fadlan booqo barta internetka ee cinwaankeedu yahay www.erz.be.ch/tagesschulen ama laxiriir macalinka qaabilsan ilmahaaga, ama maamulaha iskuulka.

Wixii inta ka baxsan oo ku saabsan caruurta sida: (ilmaha aan weli 3 sano aan gaarin ama kuwa ka weynba oo aad jeclaan lahayd in lagaa hayo saacado ama maalintii oo dhan waxaad warbixin buuxda ka heli kartaa barta internetka ee cinwaankeedu yahay www.gef.be.ch > Familie.

Shaqo Guri.
Hausaufgaben / *Devoirs à la maison*

Shaqo guri: waxay caruurta ka kaalmeysaa in uu si fiican u fahmo casharkii maanta uu soo qaatey Waxayna u tahay ilmaha muraajaco, la soco marwalba in uu ilmahaada shaqo guri sameynaayo iyo in kale waana in aad u qoondeysaa meel guriga ka mid ah oo aan buuqlahayn kuna haboon in waxlagu barto (qol waxbarasho oo leh miis iyo kursi).

Shaqada guriga waa in uu ilmaha keligiis sameeyaa ayadoo aan la caawin, haddii aad aragto in ilmaaga uusan kari Karin in uu keligii sameeyo shaqo guri, fadlan hore u ogeysii macalinkiisa.

Natiijada sanadlaha ah(Qiimeyn).
Beurteilung / *Evaluation*

Ugu yaraan hal mar sanadkii ayaa waxaa kulmaya ama ka **wada hadlaya** ilmaha waalidka dhaley iyo macalinka qaabilsan fasalka ilmaaga dhiganaayo, wada hadalkaas wuxuu ku saabsanyahay ama macalinku wuxuu qiimeyn ku sameynayaa sida ilmaha waxbarashadiisa, la dhaqankiisa iyo hawlkarnimadiisa ay tahay.

Caruurta dhigata fasalka 1 ilaa kan 6, waqtiga iskuulka la xiraayo waxay helayaan qoraalo **Cadeyn ah** qoraalkasoo ku cad siduu ku ahaa ilmaha maadooyinka kala duwan (maado walba) laga bilaabo fasalka 3 waxay helayaan shahaado, shahaadadaas oo ku qoran buundooyin maado walba buundadii uu ka keenay. Ardeyda dhigata fasalka 7-9 waxay helayaan natiijadooda labo mar sanaddugsiyeedkiiba dhamaadka teeramka koowaad iyo dhamaadka teeramka labaad walibana waxaa lagu qoraa waxbarashadiisa hawlkarnimadiisa

Buundooyinka (Darajo) la bixiyo ama shahaadada lagu qoro waxay u dhexeeyaan 1-6. Buundada ugu fiican waa 6, Wixii ka hooseeya 4 micneheedu waxa weeye ma gadhiin rajada casharka ama ma gaarin meeshii laga rabey in uu gaaro. Waxaa kale oo la bixiyaa buundooyin sida 5.5 ama 4.5).

Haddii aad u baahantahay warbixin ama faafaahin intaa ka badan ayadoo luqado badan ku qorantahay booqo barta internetka cinwaankeedu yahay:
www.erz.be.ch/beurteilung > Elterninformation

Ka habsaamid ama ka maqnaansho sabab iyo sabab la, aan.

Absenzen und Dispensationen / *Absences et dispenses*

- Ka waalid ahaan caruurta waajib baa kaa saaran in aad u dirto xanaanada caruurta ama iskuulka Waalidka aan caruurtiisa u dirin sabab la,aan ama ogaan ugu reeba iskuulka ama xanaanada wuxuu muteysanayaa ganaax.

- Ka waalid ahaan waa waajib ku saaran in aad u sheegto ilmaha macalinkiisa inuusan **imaaneyn ama maqnaanayo** maalintaas sababtana u sheegto tusaale ahaan (xanuun) iyo weliba inta aad u maleynaysid inta uu ka maqnaanaayo iskuulka ama xanaanada, maqnaasho aan sabab lahayn waa in aad si deg-deg ah u gaarsiisaa macalinka ka nabadgelyo ahaan.

- Ka maqnaashaha caruurta iskuulka ama xanaanada ee la ogolyahay sida: ilmaha oo xanuunsan, shil uu galay, ama qoyska oo geeri ku timid, guriga oo aad ka guureysaan, ama balan dhakhtar ama dhaktar ilko.

- Maqnaashaha am ka habsaamida sabab ama sabab la,aan casharada iskuulka waxaa ilmaha loogu qoraa shahaadada sanaddugsiyeedka.

Fasax ka maqnansho skulka waxa la tix gelin kara keliya haddi aad walid ahan aad arji uu so qorto mamulka skulka afar todobad ka hor. Fasax ka maqnan skulka waxa lay isku siya keliya sababaha kala ah: Iid dini oo qhaali ah, Xaflado qhoys oo muhim ah, booqosho korsyo afka hooyo ah (HSK/LCO) , iyo tagis tijabo waxbarasho xirfad .

- Sababahaas oo dhan waalidku waxay xaq u leeyihiin **ilaa 5 maalin nuskeed maalintii waa 2 gelin (Gelinka hore iyo gelinka dambe) sanaddugsiyeedkii** ayagoo wax sabab ah sheegin in ay caruurtooda ka maqnaan karaan iskuulka, fadlan la socod sii macalinka qaabilsan fasalka laba malimood ka hor.

Waxbarasha Dheeraad ah oo Ka bidah iyo Waqtiyada Fasaxa waxyaabaha ay Sameyn karaan.

Bildungs- und Freizeitangebote
Offres de formation et de loisirs complémentaires

Maadooyinka Qasabka ah waxaa Ardeyda u dheer waa hadii aad rabto Xuriyadaada aan Qasab aheyn, uu iskuulka bixiyo Maadooyinka sida Muusikada iyo Gacan ka shaqeynta waa sida Wax sawirka ama waxyaabo laysku dhadhajiyo iwm Amaba Waxbarasho iney sii wadaa iyo Mashaariicyo wax kororsi ah.

Ardeydu marka ay fasalka 7-9 dhiganayaa waxaa lo soo Bandhigayaa Maadooyinka aan Qasabka aheyn taas oo waliba Waalid ann Lacag bixineyn loogu talagaley in ubadka waxbarashadiisa lagu kobciyo.

Barashada Luqada Hooyo iyo dhaqanka (HSK / *LCO*) waxaa loogu talogalay in ilmaha ku hadlaya afafkale ama luqado badan in ay afkooda hooyo iyo weliba dhaqankooda si fiican ugu bartaan Xiisadahaan waxaa bixinaya wadamada ay caruurtu ka soo jeedaan dhalasho ahaan ama jaalliyadahooda. Qaar ka mid ah casharadaas waxaa laga yaabaa in laga bixiyo iskuulo gaar loo leeyahay waana lacag.
Wixii intaa dheer ee faahfaahin ah booqo barta internetka cinwaankeedu yahay : www.erz.be.ch/hsk

Isboortiga (Sport) iyo Waqtiyda Fasax waxyaabaha la sameeyo (sida ay Somaalida taqaan Banaan ku soo ciyaar ama la soo wareego). Caruurta iyo dhalinyaradaba waxaa badanaa u soo agaasima ururo ama jaaliyado kuwaas oo ku shaqeya iskaa wax u qabsi.Laakiin caadi ahaan Qofwalba raba inuu Naadigaas ka tirsanaado ama ka Midnoqodo waa inuu Sanakiiba, mar Lacagta ka Qaybqaadashada ama Ka tirsananta bixiyaa.

Iskuulka lagu barto muusikada ee degmada ama gobolka waxaa diyaar kuugu ah macalimiin khibrad u leh barista muusikada kala duwan waana lacag, haddii aad u baahantahay waxaad booqataa barta internetka ee cinwaankeedu yahay:
www.vbms.ch > Mitglieder

Wixii faafaahin dheeri ah ee aad u baahantahay ee ku saabsan spoortiga iyo waqtiyada iskuulka fasaxa laga yahay waxaad ka heleysaa xafiiska degmada ama xaafada aad degantahay.

Caafimaadka.

Gesundheit / *Santé*

Caruurta dhigata xanaanada iyo sanadka labaad iyo ilmaha ama Dhalinyarta dhigta iskuulka kuwa fasalka 4 iyo fasalka 8 dighta waxey marayaan baaritaan caafimaad, waxaana baaraya **dhakhtar ama dhakhtarad iyo kuwa ilkahaba** ka socda xafiiska degmada ama xaafada waana khasab ilmuhu in uu maro baaritaankaas, baaritaankaasoo ah mid lacag la,aan. Micnaha ka dambeysa baaritaankaas waa in hore loo ogaado haddii ilmaha yar maqalkiisu (Dhegaha) xunyahay, ama aragiisa (Indhaha), ama hadalkiisa (Carabkiisu culusyahay), iyo weliba masxakiyan in uu ilmaha caafimaad u qabo iyo in kale. Haddii uu dhakhtarku wax ka helo ama ka

dareemo ilmaha wuxuu ogeysiinayaa waalidka dhaley ilmaha iyo wixii arinkaas laga sameyn lahaa ama sida loo daaweyn lahaa haddii ilmuhu daawo u baahanyahay.

Waxaa la koontoroolayaa ilmaha ilkahooda **dhakhtarka ilkaha ama dhakhtarada ilkaha** marwalba, waana khasab in uu ilmahaada maro baaritaankaan waana lacag la,aan. Haddii dhakhtarku uu ka helo ilmaha ilko aan caafimaad qabin, dhakhtarku wuxuu ogeysiinayaa waalidka dhaley ilmaha, kharashka ku baxaya ilkaha hagaajintooda waxaa bixinaya waalidka ilmaha dhaley. Dugsiga hoose ilmaha waxaa la barayaa sida ilkaha loo nadiifiyo (**loo Cadeysto**).

Ogeysii Macalinka ama Macalimada qaabilsan ilmahaada hadii Cunuga ama Cunugtaba ay xanuun qabto (jiro qabto) (sida Sonkorta ama macaanka) ilmahaas oo Daaw Joogto ah Qaataan.

Wixii intaa ka badan ee faafaahin ah ee ku saabsan ilmaha iyo caafimaadkooda ayaadoo luqado badan ku qorantahay booqo bogga internetka ee cinwaankiisu yahay:
www.migesplus.ch > Kind & Gesundheit

2 Xanaanada caruurta iyo Dugsiga hoose/Dhexe.

Ujeedada (Ahdaafka iyo isku dubaridka (Qabanqaabin).

Ziele und Organisation / *Objectifs et organisation*

Xanaanada caruurta iyo dugsiga hoose/dhexe waxaa ilmaha lagu baraa ama Hormariyaa **Aqoon, Wax qabad, Karti, leh waxa ay qabanaayaanna qibrad** u leh iyo si fiican u sameenayaan iyo waxa inuu xalinkaro.

Ulajeedadu laga rabo ay tahay in ilhama iyo dhalinyarta ay iyaga Tabeecada (sida Dhirta iyo Xaywaanka iyo Mushtamaca (Bulshada) ay fahmi karaan lana qabsabkaraan. Iyagana ay noqdaan kuwa kor u qaadigi karo ama dhisi karo shaqsiyan Mas, uuliyada oo dhan ayna noqdaan kuwo marka ay isuulka qasabka ah dhameysta Mihnaq shaqo ama Waxbasho Tacliin sare sii wadan karo.

Macalimiinta waxey wax barkooda caadi ah ee u dagen **Jadwal ahaan** ku Qorsheynayaan Ujeedooyin (Af daah) go, an ama xadididan lana diyaariyey in ay Xanaadada iyo Dugsi hoose dhexe ay dhiganaayaan.

Degmo ama gobol kasta waxaa u qaabilsan **gudi iskuul,** gudigaasoo eegaya muqararka sanaddugsiyeedka ee xanaanooyinka iyo dugsiyada oo dhan, gudoomiyaha waxbarashada iyo barbaarinta ee degmada ama gobolka wuxuu magacaabayaa **kormeerayaal** iskuulada iyo xanaanooyinka kormeeraya.

Waalidku waxay ku soo **qorayaan** caruurtooda xanaanada caruurta ee degmada ama xaafada ay deganyihiin, laakiin caruurta waxaa dugsiga hoose/dhexe ku qoraaya ama si toos ah looga dirayaa Xanaanada.

Xanaanada caruurta.

Kindergarten / *Ecole enfantine*

Caruurta xanaanada waxay ka bartaan **ciyaarta**, ciyaar **waxbarasho** ah, waxay si fiican u bartaan ama u fahmaan ama ay si fiican u sheegi karaan waxay rabaan, waxay si dhakhso ah u bartaan is dhexgalka iyo isla dhaqanka caruurta kale ee ay isku fasalka yihiin ama isku kooxdda yihiin waxayna ka ursadaan waayo aragnimo dheeri ah oo u sahlaysa fahamka nolosha xanaanada caruurta waa meesha ay caruurta ka helaan kaalmo wax ku ool ah waxaana loogu rabeeyaa ama loo diyaariyaa gelitaanka iskuulka, macalinka qaabilsan ilmaha waa in uu la socdaa hadba sida ilmaha waxbarashadiisu tahay, meesha uu ka liitona uu ka caawiyo, iyo hurumarka uu ilmuhu sameeynaayo in uu kala hadlo waalidka dhaley ilmaha.

Caruurta **qaar meelo ay ku liitaan** una baahan yihiin in laga kaalmeeyo tusaale ahaan: luqada ama carabkooda culus yahay waxaan jira shaqaale loo tababaray oo caruurta ka caawinaaya.

Caadiyan xanaanada waxay soconaysaa 2 sano, laakiin haddii ilmaha weli luqada ku adagtahay Wuxuu **aadi karaa dugsiga hoose** Ama 1 sano dib loo dhigo ama Fasalka 1aad uu bilaabo balse (laakiin) Daruusta fasalka koowaad 2 sanadood uu ku qaato.

Caruurta aan u dhalan luqaddaha wadanka looga hadlo oo afkooda hooyo ahayn,kuna adagtahay in ay ku hadlaan ama fahmaan markay xanaanada ku jiraan waxay helayaan caawimaad dheeraad ah **Si fiican ugu hadalka ama barashada afka-Jarmalka, iyo afka Faransiiska waa udub dhexaadka guusha ubadkaada mustaqbalka.** Markaa ku dadaal ilmaha ka hor xanaanda caruurta u ogolow in uu ilmo kale oo wadanka u dhashey la ciyaaro si uu luqada ugu sii barto inta uusan tegin xanaanada **weydii xafiiska degmada ama xaafadda meesha caruuraha da,doodu tahay 2 sano layskugu keeno oo ay ku cayaaraan** waalidiintuna isku bartaan ama ha noqoto hooyooyinka amaba aabeyaasha caruurta dhaley.

Fiiri sida boga 16 ku cad: sida ay waalidku qeyb libaax ugu qaadan karaan in caruurtooda ku najaxdo iskuulka.

Wixii intaa ka badan ee faafaahin ah oo ku saabsan xanaanada caruurta ayadoo luqado badan ku qorantahay booqo barta internetka ee cinwaankeedu yahay: www.erz.be.ch/elterninfo > Kindergarten

Dugsiga hoose (fasalka 1-6)

Primarstufe / *Degré primaire*

Ardada dhigata fasalka 1 ilaa 6 waxay bartaan waxyaalaha aasaasiga u ah aqoonta sida wax **akhrinta qorista iyo weliba xisaabta** waxay kaloo baranayaan waxyaalo badan oo aasaas u ah aqoonta sida farshaxanka ama in ay keligood hawl maalmeedkooda maareyn karaan Badanaa isku waqti qura ayey caruurtu baranayaan maadooyin kale duwan, waqtiba waqtiga ku sii xiga caruurtu waxay baranayaan in ay isku filnaadaan, waxayna ogaanayaan waajibka saaran.

Laga bilaabo fasalka saddexaad ardayda waxay baranayaan magaalooyinka Afka-Jarmalka loogu hadlo **luqadooda labaad waana faransiis**, magaalooyinka loogu hadlo Afka-Faransiiskana waxay baranayaan **afka jarmalka**.

Laga bilaabo sanadku markuu yahay 2013 labada qeybood ee labada af (Jarmal iyo Faransiis) loogu kala hadlo magaalooyinka marka laga bilaabo fasalka 5 waxaa ku soo kordhaya **luqadda Ingiriiska** (waqti xaadirkan ingiriiska waxaa la bartaa marka la soo gaaro fasalka 7).

Marka laga bilaabo fasalka 5 iyo 6 waxaa u bilaabmaya caruurtaada u gudbida dugsiga dhexe **waana marka caruurta lakala saaraayo** hadba ilmaha meesha uu aadi lahaa waana is reereeb waxaana lagu soo kala xulaa heerka waxbarashada ama aqoonta dugsiga hoose (Sekundarstufe I / *Degré secondaire I)* (fiiri qeebta afarad ee balkan).

Caruurta **dhibaato ka haysato luqadda ama waxbarashada** ama aan awood u lahayn maskaxiyan in ay la qabsadaan iskuulka si ay natiijo wasaagsan ugu gaaraan waxaa kaalmo diyaar ula ah macalimiin khibrad uleh arintaas. Tusaale ahaan caruurta dhibaato ka haysato waxbarashada ama ku adag tahay ayadoo ogolaansho laga haysto waalidka waxaa loo dirayaa baaritaan, baaritaankaas oo lagu ogaanayo in ilmaha yar uu u baahanyahay **caawinaad dheeri (casharo dheeri ah)** ah iyo in kale.

Casharada gaarka (xiisadaha) ah ee loogu talogalay in caruurta lagu caawiyo (Spezialunterricht / *l'enseignement spécialisé*) waxay baxayaan waqtiyada xiisadaha kale la bixinaayo ama iskuulka la joogo waxaana lagu bixiyaa meel ka baxsan fasalka ay ardeydu wada dhigtaan. Degmooyin badan waxay leeyihiin **iskuulo ama fasalo u gaar ah** ardada waxbarashadu ku adagtahay (Besondere Klasse / *Classe spéciale*) waana ka arday yeryihiin fasalka gaarka ah fasalada caadiga ah, xiisadahana waxaa bixinaya macalimiin u gaar ah oo loo tababarey in ay waxbaraan caruurta ku adag waxbarashada.

Waxaa kaloo jira **fasalo gaar ah oo loogu talo galey caruurta maskax fiican leh ama (maskax furan)** oo waxwalba hore u fahmaaya, laakiin waxaa shuruud ah in uu ilmagaada fasalkaa galo, gudi imtixaan ka qaadaya ilmaha yar, eegayana maskaxiyan.

Ka gudbida dugsiga hoose iyo (u gudbida) gelintaanka dugsiga dhexe.

Übertritt von der Primar- in die Sekundarstufe I
Passage du degré primaire au degré secondaire I

Ilmahaaga markuu ku jiro fasalka 5-6 wuxuu u **diyaargaroobayaa ka gudbida** dusiga hoose wuxuuna u gudbayaa dugsiga dhexe.

Dugsiga dhexe (waa fasalka 7-9) waxayna ukala baxayaan labo ilaa saddex geybood sanadka 7 ardayda waxay u kala baxayaan ama u kala qeybsamayaan **ayadoo loo kala eegayo ama lagu qiimeynayo hadba heerka waxbarasho ama garaadkooda** macalinka fasalka qaabilsan marka ay caruurtu ku jiraan fasalka 5 wuxuu ku wargelinayaa caruurta iyo waalidkoodaba sida loo kala xulayo caruurta iyo weliba dugsiga dhexe qeybta ay ka tagi doonaan.

Fiiri bogga 8 ee ku saabsan dugsiga dhexe, iyo bogga 10 ee dugsiga hoose ka dib.

Wixii faafaahin intaa ka badan iyo weliba kala shaandheynta caruurta dugsiga dhexe meesha ay ka tagayaan ayadoo afaf badan ku qorantahay waxaad ka heli kartaa barta internetka ee cinwaankeedu yahay :
www.erz.be.ch/beurteilung > Elterninformation

Dugsiga dhexe waa (fasalka 7-9).

Sekundarstufe I / *Degré secondaire I*

Dugsiga dhexe ardayda waxay xisadaha ama casharada u kala qaataan guruubyo ama kooxo kala ah ila labo ama sadex darejo waxayna ku xirantahay **heerka aqoontooda**.

Gobolka qeybta Afka-Jarmalka loogu hadlo dugsiga dhexe waxay u kala baxaan 2 qeybood kuwo aqoontooda sareyso (Sekundarklassen) oo loo carbinayo ama diyaarinayo in ay ka sii galaan dugsi sare, iyo kuwo aqoontooda iska liidato (Realklassen). Degmooyinka qaarkood ardayda aan kor ku soo sheegney ee aqoontoodu fiicantahay waxay u saaraan gaar iyo jadwal gaar iyo weliba macalimiin gaar ah (spezielle Sekundarklassen) laakiin arintaas waxay ku xirantahay degmada ama xaafada aad degantahay ayadaana xaq u leh haddii ay ardeyda

kala qeybineyso oo xiisado kala ah iyo macalimiin kala gaar ah u hayso iyo haddii kale.

Gobolka qeybta Afka-Faransiiska loogu hadlo ardayda waxay kala galayaan ilaa 3 fasal oo kala duwan oo kala ah g,m,p laakiin isla iskuulka ah waa isku dhismaha oo waxay ku xirantahay aqoontooda kuwa ku liita waxbarashadad kuwa dhexdhexaad ah iyo ku waxbarashadooda sareyso *section générale („section g“)*, waxbarasho guud *section moderne („section m“)* waxbarasho meel dhexe ah iyo kuwo waxbarashada ku fiican waxaa loo diyaarinayaa dugsi sare *section préparant aux écoles de maturité („section p“)*. *„section m“* iyo *„section p“* waxaana laga rabaa ama laga sugayaa natiijo sare waxay wada dhiganayaan isku iskuul oo dhismaha iskuulku waa mid laakiin waxay galayaan xisado ama fasalo kala duwan.

Dugsiga dhexe wuxuu leeyahay ama ardayda waxay helayaan xiisado dheeri ah oo lagu caawinaayo kuwa waxbarashadooda liidata iyo kuwa kaleba.

Dugsiga dhexe ardeyga waxaa laga sugayaa ama laga filayaa in uu wax badan keligiis ama isla guruubkiisa ama kooxiidasa sameynkaraan, waxbarashada guud waxay noqonaysaa mid gudaha loo sii galo wayna balaaraneysaa tusaale ahaan meeshii markii hore ahayd saynis markaan waxay u kala baxayaan (Bayologi, fisigis, kimisteri) oo mid walba uu gaarkiis u sii kala baxaayo. Markaa ardeyga wuxuu kala **dooranayaa in uu farsamo gacanta ah barto (Mihnad)** ama shaqo noocay noqotaba ha ahaatee oo loo diyaariyo laguna caawinayo iyo in uu waxbarashada sii wadanayo oo iyadana lagu caawinayo (Berufswahl / *choix professionnel*) ardeyga waxaa loo eegayaa wuxuu jecelyahay ama awoodo in uu mustaqbalka sameeyo ama barto waana lagu caawinayaa ama lala barbartaagan yahay waxaana diyaar u ah in ay ku caawiyaan waalidka ilmaha dhaley macalinka ama horjoogaha fasalka qaabilsan iyo weliba xafiiska latalinta shaqada iyo shaqaalaha.

Macalinka fasalka ama horjoogaha fasalka wuxuu waqti hore talo iyo tusaale kaa siinayaa doorashada shaqo iyo **helida meesha aad ku baran lahayd shaqada aad** mustaqbalka aad doonaysid in aad ku taas oo ku xiran waxa adigu **ka sugeysid shaqada iyo shuruudaha laga doonaayo** shaqeysato iyadoo uu waalidkaana la gaarsiinayo warbixintaas.

Fiiri bogga 10 dugsiga dhexe ka dib iyo bogga 4 ee ku saabsan natiijada ama Qiimeynta.

Dhalinyarada iyo caruuraha cusub ee hadda soo degaya magaalada ama Gobolka.

Neuzuziehende Kinder und Jugendliche / *Nouveaux arrivants*

Haddad tahay qof magaalada ku cusub oo hadda soo degay wixii tafaasiil ah oo ku saabsan xanaanada caruurta iyo iskuulba waxaad ka helaysaa xafiiska degmada, ama waxaad si toos ah ula xiriirtaa maamulaha iskuulka. Ilmahaaga hadduu yahay da,da iskuul oo qorshihiinu yahay in aad muddo bilooyin ah aad joogtaan Swizerland ka waalid ahaan waxaa waajib kuugu ah in aad ilmaha iskuulka aad geyso, waqti kasta oo ah inta uu socdo sanaddugsiyeedka waa macquul ama suurogal in ilmaha xanaano ama iskuul helo.

Qoysaska cusub ee hadda magaalada soo dega caruurtooda waxay iskuulka ku galaan waa la dhegeystaa oo waxaa qiimeyn lagu sameeyaa meesha uu garaadkoodu joogo ama haddii ay wataan waraaqo caddeyn ah ama shahaado si loogu helo fasal u qalma ayadoo laga eegaayo da,dooda iyo inta fasal ee ay hore u soo dhigteen, ama haddii ay hore u soo dhigteen dugsi dhexe waxaa la eegayaa heerka ay ka joogaan waxbarashada. Waxaana qiimeyn ku sameynaya maamulaha iskuulka.

Laga bilaabo fasalka 5 caruurta ama dhalinyarada aan weli aqoon afka oo wadanka dibadiisa iskuul ku soo dhigtey, waxaa u wanaagsan in uu ku celiyo fasalkaa uu hore u soo dhigtey waxayna u noqonaysaa muraajaco waana waqti ku filan in uu manhajka la qabsado luqadana ku barto.

Caruurta ama dhalinyarada aan aqoon afka wadanka looga hadlo ama wax yar ka yaqaana waxay helayaan caawinaad dheeri ah **[Deutsch als Zweitsprache (DaZ)]** waa qeybta gobolka ka mid ah ee loogu hadlo afka Jarmalka, qeybta loogu hadlo afka Faransiiska waa sidaa oo kale **[français langue seconde (fls)]** waana lacag la, aan waana inta ay socoto waqtiga xisadaha waxaana lagu bixinayaa fasalka ama meel ka baxsan fasalka (iskuulka).

Magaalooyinka waaweyn caruurta ama dhalinyarada cusub ee aan aqoon afka iskuulka ka hor 10 usbuuc ayaa si dhaqso ama xawli ah waxaa loo barayaa afka.

Booqashada uu ilmahhada uu booqanayo xiriirada ama naadiyada spoortiga ama iskuulada ay afkiisa hooyo iyo weliba dhaqankiisa (micnaha waxaa laga wadaa iskuulada Jaaliyadaha ay leeyihiin ee lagu kaalmeeyo caruurta ama dhalinyarada soo galootiga ah) (HSK / *LCO*) si dhaqso ah bay caruurta u caawisaa wayna u **sahashaa barashada luqadda iyo fahamka wadanka** si dhaqso ah iyo weliba waxay u sahlaysaa isdhexgalka bulshooyinka kala duwan.

Fiiri bogga 10 dugsiga hoose/dhexe kadib.

3 Ka dib Dugsiga hoose/dhexe.

Fursado waxbarasho.
Ausbildungsmöglichkeiten / *Possibilités de formation*

Tubta toosan ee aad shaqo rasmi ah ku barankarto ama waxbarasho sare ku gaari kartid ma,aha sidaad moodeysid oo sidii hore ma,aha ama haddii aadan ku korin Swizerland wey ka duwantahay waxbarashada halkan wadankaagii hooyo, manta waxaa jira in ka badan 250 mihnadood, oo dugsiga hoose/dhexe ka dib si toos ah loo baran karo.

Dugsiga hoose/dhexe ka dib ilmahaaga haddii uusan ka faa,iideysan fursaddaa qaaliga ah ee waxbarasho ha noqoto mihnadaha kala duwan ama waxbarasho sare, mihnad la,aan ama waxbarasho sare la,aaan way ku adkaaneysaa in uu shaqo fiican oo mushahar fiican leh helo, mustaqbalkiisuna wuxuu ku jira mugdi.

Barashada mihnadaha kala duwan.
Die Berufliche Grundbildung (Berufslehre)
La formation professionnelle initiale (apprentissage)

Badanaa dhalinyarada waxay mihnadooda bartaan ka dib dugsiga hoose/dhexe, waxay ka bartan farsamada xirfad gacanta ah (Berufslehre) shirikad oo halka laga siyo **tababar** 2-4 sano ah kadibna wuxuu helayaa shahaado ama warqad cadeyn ah in uu bartey farsamo isla waqtigaas usbuucii 2-3 jeer wuxuu tagayaa iskuul u gaar ah ardayda farsamada barata oo uu ka kororsanaayo wixii cusub (Berufsfachschule / *école professionnelle*), oo uu ka baranaayo casharo ku sabsan tababarkiisa. Waxaa **heshiis** kala saxiixanaya ardayga baranaaya farsamada, iyo iskuulka mihnada iyo shirakada baraysa xirfada. Waxa jira farsamo ama xirfad laga barto skulo uu dhigaya ardayga taclin qoral keliya oo tababar gacanta una jirin(Ganacsi) waxa ka mid ah [Handelsmittelschule (HMS) / *les écoles supérieures de commerce (ESC)* iyo kuwa layiraho Lehrwerkstätten / *les écoles de métiers*].

Sababta laysugu daray macadka iyo meesha shaqada laga baranaayo waxaa weeye in uu wiilka ama gabadha dhalinyarada ah la siiyo fursad ay ku helaan mihnad fiican oo noloshiisa ku maareyn karo Fursad qaali ahna ka ah xafiiska shaqaalaha iyo in uu meel ka weyn uu sii gaaro.

Ardayda natijadodu fican yihin waxa uu banan in ay tababarka iyago ku jira tababarka ama tabarka ka dib ay sameeyan shahadada dugsiga sare nooca layiraho “Berufsmaturität” (Berufsmaturität / *maturité professionnelle*) oo markasna uu baneenaysa wax barasho jamacada lagu sheego magaca (Fachhochschule FH / *école spécialisée HES*) in uu geli karo.

Wixii faahfaahin intaa dheer waxaad booqataa barta internetka ee www.erz.be.ch/berufsbildung

Dugsi sare.
Die Mittelschulen / Les écoles moyennes

Dugsiga sare (waa dugsi sare oo maado khaas ah la baranaayo) [Fachmittelschule (FMS) / *école de culture générale (ECG)*] waxay diyaar kuula yihiin 3 sano oo waxbarasho ah kuna saabsan caafimaadka sida kalkaaliye caafimaad, iyo sida dadka ka shaqeeya xanaanada caruurta ama dadka dhaqaaleeya dadka da,da ah ama waayeelka ah.

Ardeyda ugu fiican ee keenta natiijo fiican waxaa u furan si toos ah in ay ayagoo aan meelo kale soo marin in sanadka 9 **dugsi sare** galaan (Gymnasium / *gymnase*) gobolka qeybta afka Jarmalka loogu hadlo wuxuu bilaabmayaa sanadka 9 wuxuuna soconayaa 4 sano, degaanada ama gobolada afka Faransiiska loogu hadlo wuxuu bilaabmayaa sanadka 10 wuxuuna dhamaanayaa 3 sano ka dib. Waxbarashada dugsiga sare waa waxbarasho aad tayo u leh oo dhalinyarada waxay dhexgalayaan cilmiyo kala duwan markey dhameeyaan ayna ku najaxaan imtixaanada ama shahaado ka qaataan (Matura / *maturité*) waxay si toos ah u gali karaan jaamacadaha/Polyteknik [Universität / *Université*, Eidgenössische Technische Hochschule (ETH) / *École Polytechnique Fédérale (EPF)]* kala duwan hadba teey doorbidaan ayadoo aan wax shuruud ah lagu xirin Halka ardeyda kale shuruudo adag iyo buundooyin sare lagu xiro, oo loolan xoogan ay maraan ama waxay qaadan karaan 1 sano oo baraaktika ah jaamacadii ay doonaan.

Dhalinyarada ka imaaneysa dibadaha ama u soo guuraaya gobolka Bern oo gobolo kale oo Swizerland ah ka soo guuraaya oo raba in ay waxbarashadooda dugsiga sare ay ka sii wataan gobolka Bern waxaa halkaan laydunkugu diyaariyey warbixino oo afaf badan ku qoran:
www.erz.be.ch/aufnahmegym

Wixii faafaahin dheeraad ah ee ku saabsan dugsi sare iyo shuruudaha layska rabo waxaad booqataa barta internetka ee cinwaankeedu yahay:
www.erz.be.ch/mittelschulen

Xal meel dhexe ah.
Zwischenlösungen / *Solutions transitoires*

Marka uu ilmahaada waxbarashadiisa liidato, ha keento liidashadaas luqada oon si fiican u aqoon darteed, fasalka 9 marka ardeydu kala baxayaan haddii natiijadii mihnad lagu baran lahaa weli uu san gaarin, waxaa la **siinayaa fursad kale oo ah in uu galo fasalka 10 oo mihnad** lagu diyaarin karo Fursaddaan waxay kaloo u furantahay **dhalinyarada ku cusub** gobolka oo ka soo guurey gobolada kale ama wadanka dibadiisa ka yimid da,dooduna u dhaxayso 16-18 jir oo luqada aan aqoon amaba wax yar ugu bilaabanyihiin: www.erz.be.ch/bvs

Haddii aad u baahantahay faafaahin dheeri oo ku saabsan xalka noocaan ah la xiriir macalinka ilmahaaga qaabilsan ama xafiiska u qaabilsan degmada aad degantahay waxbixinada (BIZ / *CIP*).

Warbixino dheeraad ah.

Weitere Informationen / *Plus d'informations*

Waxyaalihii aan halkaan ku soo sheegney oo ku saabsan waxbarashada dugsiga hoose/dhexe ka dib iyo weliba fursadaha weli kuu furan.
Faafaahin ku saabsan doorashada mihnad iyo xafiisyada talobixinta ama la talinta meelaha ay ku yaalaan (BIZ / centres *OP*):
www.erz.be.ch/berufsberatung

Warbixino ku saabsan sida ugu haboon ee aad u dooraneysid mihnada aad rabtid in aad barato kadibna ku shaqeysid mustaqbalka ayadoo afaf badan ku qorantahay waxaad kaga bogan kartaa barta internetka ee cinwaankeedu yahay:
www.berufsberatung.ch/dyn/8188.aspx

Habka ama jidka aad u mareysid waxbarasho ka dib dugsiga hoose/dhexe ayadoo garafik ah booqo barta internetka ee cinwaankeedu yahay:
www.erz.be.ch/berufsbildung

4 Waalidka iyo iskuulka.

Wada shaqeynta ka dhexeysa waalidka iyo iskuulka.

Zusammenarbeit / *Collaboration*

Waalidka iyo iskuulka in ay wada shaqeeyaan waxaa qoray sharciga, wada shaqeyntaasu wa mid wajib ah oo lo simanyahay oo lagu fulinayo danta ilmaha. Halkaa waxaa ka soo baxaya ilmaha in ay guul ka gaaraan waxbarashada.

Isdhaafsashada warbixinada waalidka iyo macalinka.

Gegenseitige Information / *Information mutuelle*

Xanaanada Caruurta iyo iskuulka waxey waalidka war gelinayaan wax yaabaha jira ama dhaca kuwaas oo ku saabsan waxbarashada (Xafladaha, Safarada ay Ardaydu gasho iwm) iyo habka uu iskuulka u shaqeeyo (iskuulka ama fasal lagu la fadhiisinayo, Jadwalka iwm). War galinadaan waxaa laguugu shegayaa iyadoo qoraal ah ama **Habeenka waalidiinta** Elternabend iyo Maalmaha Booqashada (Besuchstagen). Waxaa la sugayaa in labada dhinac oo Waalidka ah iney ka soo qayb galaan haddi ay macquul tahay. Hadii ay **labada dhinac ee waalidka** aynan imaan karin, wa in ay war geliyaan macalinka ama maclimada casuumadaas soo direy, iyadoo ay sidaa tahey weydii sidii aad u heli laheyd Aqbaarta ku dhaaftey.

Xanaanada caruurta iyo iskuulkuba waxay marwalba diyaar u yihiin in ay warbixin buuxda kaa siiyaan sida uu ilmahaada yihiin xag aqlaaq ama waxbarasho iyo weliba xaga garashadiisa sanaddugsiyeedkii ugu yaraan halmar waa in ay **wada kulmaan** waalidka iyo iskuulka ama xanaanada (fiiri boga 4 ee Qiimeynta caruurta uu macalinku qiimeeyo xaga waxbarashadiisa iyo edebtiisa) waxaana la idinka filayaa in ay **labada waalidba** ka qeybgalaan kulanka, waana la idiinla balami doonaa waqti idinkuna munaasib idiin ah.

Mar walba oo aad dareentid in aad warbixin kuugu filan aadan helin ama u baahato macluumaad dheeri ah kuna saabsan ilmaha hanoqoto waxbarashadiisa ama aqlaaqdiisa weydii macalinka horjoogaha fasalka ama maamulaha iskuulka ama xanaanada.

Waad booqan kartaa hadba fasalka uu ilmahaada ku jiro keliya macalinka fasalka ama horjoogaha fasalka markaad ilmahaada iskuulka ama xanaanada ku booqaneyso ogeysi.

Weydii macalinka fasalka ka ah horjooge wax alle wixii ku saabsan ilmahaada oo wax u dhimi kara koritaankiisa iyo garaadkiisa.

Fiiri bogga 5 ee ku saabsan maqnaashaha.

Tarjumaan.

Übersetzung / *Traduction*

Waa muhiim in aad **fahmeysid** marka adiga iyo macalinka ilmahaada ka wada hadlaysaan ama habeenada uu iskuulku ku casumo ee wadahadalka iskuulka iyo waalidka loogu magacdarey, waana arin xaasaasi ah in aad **su,aalahaada soo bandhigi kartid ama haddii aad wax tabaneysid aad sheegan kartid**, haddii aadan garaneynin luqadda ama aad ku liidato waxaad hore u soo wadan kartaa qof qaangaar ah oo kuu tarjuma, ama haddii ay jirto arin muhiim ah oo laga wada hadlaayo iskuulka ayaa kuu dalbaaya tarjumaan, kaasoo arinta marwalba dhexdhexaad ka ah, ahna qof loo yaqaan tarjumaanimo oo la soo dhaariyey.

Go, aanada muhiimka ah.

Wichtige Entscheide / *Décisions importantes*

Go, aanada ugu mihiimsan ee ku saabsan xagga iskuulka ee caruurtaada tusaale ahaan markuu dhameeyo ee uu aadayo dugsiga hoose, ama uu ka xabaayo dugsi hoose ee uu galaayo dugsi dhexe ama dugsi sare ama iskuul gaar ah, talaabo kasta ee ku saabsan ilmahaaga waxbarashadiisa waxaa lagala hadlayaa adiga iyo ilmaha talaabda hore u qaadaya, waxaad xaq u leedahay in faafaahin buuxda lagaa siiyo, heerka waxbarasho ee ilmahaada hadba uu joogo iyo meesha ku haboon **waxbixinadaas oo dhan xataa haddii aad dooneysid wixii keyd ah ee laga keydiyey ilmahaada xaqbaad u leedahay in lagu tuso oo aad akhrisatid**, waxaa ku siinaya macalinka horjoogaha u ah caruurtaada ama maamulaha xanaanada amaba iskuulka, go,aanka ku saabsan ilmahaada waxaa ka gaaraya maamulaha xanaanada ama iskuulka waana in lagu siiyaa ayadoo qoraal ah oo weliba mid walba sababaheeda ku cad. Haddii aadan ku qancasanayn go,aanka uu maamulaha ku siiyey waxaad xaq u leedahay in aad ka dacwooto, dacwadaas oo aad u gudbineysid kormeerayaasha xanaanada ama iskuulka ee Gobolka.

Fiiri bogga 4 ee xukmida ama (Qiimeynta xaga waxbarashada).

Gacan ku siin ama kutaakuleyn.

Mitwirkung / *Participation*

Haddii ay fursadaada kuu saamaxeyso aadna awoodid in aad gacan ku siiso iskuulka ilmahaaga ku jiro waxyaalaha ay u baahanyihiin tusaale ahaan marka caruurta meel la geynaayo in aad raacdo oo kaalmeeyso ama shaqo yar oo iskuulka laga dhexqabanaayo ama u tarjumid qoyskale oo caruurtoda iyagana iskuulka dhigata oo afka aqoon adiguna garaneysid luqada qoyskaas ku hadlayaan, haddii aad diyaar u tahay shaqada noocaas ah u sheeg macalinka fasalka ilmahaada uu dhiganaayo horjooge ka ah waxayna arintaas kuu horseedeysaa isfaham wanaagsan oo adiga iyo macalinka dhexmara.

Xanaanooyin badan iyo iskuulo badanba waxay leeyihiin **guddi waalidiin**, kaas oo ay sanaddugsiyeedka bilowgiisii iska soo dhexdoortaan waalidiinta dhaley caruurta fasalkaas dhigata waxayna ka koobanyihiin 1 qof ilaa 2 qofood, waxayna la shaqeynayaan macalimiinta fasalkaas wax u dhigta ama hadday xanaano tahay kuwa qaabilsan fasalkaas,waxayna hormuud ka noqdaan sidii xiriir wanaagsan u dhexmari lahaa macalinka iyo waalidka, iyo weliba is dhaafsiga macluumaadka ku saabsan caruurta waxbarashadooda, iyo weliba abaabulada guud ee iskuulka. Gudiga waalidiinta waxay ka shaqeeyaan xalinta mashaakilaadka ka dhex taagan waalidka iyo macalimiinta caawinaada ay macalimiinta u baahanyihiin, ama shaqooyinka yaryar ee iskuulka dhexdiisa laga qabanaayo ama markaay noqoto in iskuulka oo dhan ama fasal loo hadlaayo waxay u baahanyihiin.

Wixii intaa dheer ee faafaahin ah ee aad u baahantahay ee ku saabsan xanaanada ama iskuulka waxaad la xiriirtaa macalinka fasalka horjooge u ah ama si toos ah ula xiriir maamulaha xanaanada ama iskuulka.

5 Duruufaha waaweyn (adag) ee iskuulka xagiisa ah ee hadba caruurtaada la soo gudboonaada.

Haddii uu ilmahaaga uusan iskuulka ku qanacsaneyn ama uusan ku faraxsaneyn ama waxbarashadiisu hoos u dhacayso waxaa laga yaabaa in inuu mashaakil ku qabo caruurta kale ee da,diisa ah ama adiga ka waalid ahaan ayaadan ku faraxsaneyn go, aan uu maclin ku siiyey.

Xalinta dhibaatada jirta ama sida loo wajahayo ama loogu baxaaayo.

Vorgehen in schwierigen Situationen
Marche à suivre dans des situations difficiles

Dhibaatooyinka ilmahaaga uu kala kulmaayo iskuulka hanoqoto xaga macallin ama ardada kale ee isku fasalka yihiin xalinta waxay ku jirtaa sidaan soo socota:

1. Waalidka ilmaha dhaley iyo macalinka ayaa marka hore xiriiraaya waxayna raadinayaan labada dhinacba xal, xalkaasoo u cuntamaya labada dhinacba oo lagu qanci karo.

2. Marka ay xalinwaayaan labada dhinac waalidka iyo macalinka, oo labada dhinac uu dhinac u cuntami weydo arinta markaa arinta waxaa loo gudbinayaa maamulaha iskuulka waxaana wada hadlaaya maamulaha iskuulka waalidka iyo macalinka.

3. Haddii weli uu xal imaan ama xal laga gaari waayo arinta ama weli su,aali taagantahay markaa arintaa xalinteeda waa in lagu wargeliyaa kormeerayaasha iskuulka.

Talaabooyinkan waa in xaga Waalidka iyo xaga Macalimiintaba laga hayo. Haddii loo baahdo Turjumaan waa la Dalbi karaa.

Ka hortagidda mashaakilaadka ama dhibaatooyinka xaga aqlaakhda ah.

Massnahmen bei Disziplinproblemen
Mesures en cas de problèmes disciplinaires

Talaabooyinkan waa in xaga Waalidka iyo xaga Macalimiintaba laga hayo. Haddii loo baahdo Turjumaan waa la Dalbi karaa Iskuulka wuxuu mas,uul ka yahay habsami u socodsiinta hawlaha iskuulka, caruurtana in ay dareemaan kalsooni buuxda xaga iskuulka guud ahaan gaar ahaana macalinka horjoogaha u ah fasalka iyo in ay si fiican wax u barankaraan. Ardada waajibka saaran (sharci ahaan) waxaa weeye **wadanoolaashaha iyo is ixtiraamka dhexdooda ah** iyo macalimiinta ama ha noqoto iskuulka guud ahaan gaar ahaana fasalka ardada wada dhigata,waana waajib in la qaato awaamiirta macalimiinta ama maamulaha iskuulka haddii la ilaalin waayo sharcigaas ama la jebiyo sharcigaas haddii uu ilmuhu jabiyo sharcigaas waa in la ogeysiiyaa waalidka dhaley ilmaha waxayna ka mid tahay **mashaakilaadka ama dhibaatooyinka waaweyn ee u baahan in la xaliyo.**

Hadii Talaabadii la qaadey ay isbadel keeni wayso Iskuulka waxa uu dalbankaraa dad Taqasus leh. Haddii uu Ardey ama Ardayed sharciya iskuulka lagu ilaalin karin,Gudiga iskuulka wuxuu qori karaa warqad uu Ardeygas/ das iskuulka kaga maalmo lagaga Ceyrindoona ama gabigiis iskuulka oo dhan **lagaga Fadhiisinayo** (Eryo) qoraal ahaan. Gudiga iskuulka waxey awood u lee yihiin 12 Asbuuc iney Ardeyga ama Ardayada iskuulka ka Eryaan,qayb ka mid ah erintaas waxey Taqususayaasha la hool saarey iyo waaalidkaba ay is kuugu dabaridikaraan in loo suubiyo Barnaamij uu Ardeygas ama Ardayadaas ku Mashquulo.

6 Dhibaatooyinka culculus ee xaga barbaarinta.

Xataa haddii aad qabto su,aal ku saabsan tarbiyadda ama barbaarinta ubadka waxaad kala tashataa macalinka horjoogaha u ah (kaabogalaas) caruurtaada, weydii waalidiinta kale sidii ay ka yeeli lahaayeen dhibaatooyinkaan cusculus ee ku saabsan tarbiyada ama barbaarinta ubadka.

(Xurunta) Talosiin ku aadan tarbiyadda ama barbaarinta ubadka, taas oo ay bixinayaan khubaro.
Beratung durch Fachpersonen
Conseils prodigués par des spécialistes

Macalinka caruurtaada ka dib waxaad la tashan kartaa dadka ku xeel dheer tarbiyadda ama barbaarinta caruurta Wixii talosiin ee ku aadan caruurta la xiriir xafiiska u qaabilsan gobolka ama degmada talosiinta waalidka xaga barbaarinta.

(Xurunta) Xafiiska talosiinta ama talobixinta ku aadan barbaarinta u qaabilsan degmada ama gobolka waxay diyaar kuula yihiin talo iyo tusaale:

- Haddii dhibaato ama mashaakil kaa haysto tarbiyadda ama barbaarinta caruurta oo u baahantahay caawinaad dheeri ah (caruurta hadal kaa maqlaynin, xanaaq badani cabsi weyn ku haysato mustaqbalka oo muran badan ka dhexjiro caruurta dhexdooda, oo marwalba dagaal layskula jiro ama mashaakil kala haysta caruurta isku da,ah, in uu ka soo baxo shaqadiisa ama waqti badan uu ku qaato fadhinta Internetka, khamri cabid barto ama muqaadaraad barto ama waqti badan uu geliyo wareeg badan iwm ama ilmaha marwalba qushuucsanyahay (cabsi ku jirto) ama cuntada uu diido ama cunayn).

- Marka qoyska uu dhibaato kala haysto (kuwo raba in ay kala guuraan ama is furaan ama dhibaato kale dhextaalo qoyska iyo iwm).

- Marka uu ilmaha iskuulka dhibaato ka haysato (xag waxbarasho ama xaga fahamka amaba xaga la dhaqanka dadka kale) si loo ogaado halka dhibaatada ka jirto si loo caawiyo waxaa arji wada qoraaya waalidka ilmaha dhalay iyo iskuulka.

- Marka dhibaato ka taagantahay fasal ama iskuul tusaale ahaan midabtakoor ama awood isu sheegasho.

Wixii intaa ka badan ee fahfaahin ah kala xiriir ayadoo luqado badan ku qorantahay iyo weliba cinwaanada aad u doonan kartid talosiin buuxda meesha kuugu dhow waxaad booqataa barta internetka ee cinwaankeedu yahay:
www.erz.be.ch/erziehungsberatung

Degmooyinka qaarkood waxey leeyihiin Kuwo ku **Taqaqusey arima Bulshada iskuulka** (Schulsozial-arbeiterin oder Schulsozialarbeiter) Qaybta Faransiiska lagaga hadlo Gobalkan waxaa jir kuwo **shaqadooda ah Dhaxdhaxaadiyayaal**. Taqa-susayaahaan xataa ayaad la xiriiri kartaa hadii uu dhib kula soo gutboono. Quburadu way kaa caawinayaa arima ku haysto talaabada ku xigta hadii aad ka dalbato.

Wadahadalka u dhexeeya adiga iyo dadkaa aan kor ku soo xusney haddii loo baahdo waxaa loo yeeri karaa **tarjubaan**.

Qubaradaas oo dhan waxey hoos tagayaan Sirta in ay ilaaliyaan.

7 Waalidka sida uu qeyblibaax ugu qaadan karo ku najaxidda iskuulka.

Koritaan wanaagsan (hanaqaad) waxaa saldhig u ah sanadka ugu horeeya, waana muhiim la socodka Talo iyo tusaale barbaarinta ku wajahan waxaad ka helaysaa ayadoo luqado badan ku qoran buuga yar ee la yiraahdo (u diyaargarowga iskuulka) (Fit für die Schule / *Prêt pour l'école*): www.erz.be.ch/erziehungsberatung

waad awoodaa in aad qeyblibaax ka qaadatid waxbarashada caruurta.

Tusi iskuulka in aad daneyneysid waxbarashada caruurtaada.

- Wanaaji xiriirka adiga iyo macalimiinta iskuulka idiinka dhexeeya kana qeyb gal shir ama xaflad kasta uu iskuulku soo abaabulo ama soo qabanqaabiyo kuna taageer waxaad halkaa dameensiineysaa caruurtaada in uu iskuulku muhiim yahay xiriirka idiinka dhexeeya adiga iyo macalimiinta wuxuu ilmaha u horseedayaa in waxkasta wixii uu u baahanyahay loo fududeeyo.

- Ka dhageyso Caruurta marka ay Guriga (Aqalka) ku soo laabtaan eyna kuu sheegayaan waxey iskuulka kala soo kulmeen iyo waxa ay soo Barteen.

Ku dhiiri geli kuna caawi ilmaha iskuulka.

- Ilmuhu waa in uu welwel la,aan (Nasadey) iyo asagoo soo quraacdey iyo weliba cuntooyin yar yar ama furuut wato uu iskuulka soo galaa.

- Ilmaha haku keenin iskuulka gaari soo lugeysii ha u noqoto lugobaxsi wuxuuna ku baranayaa jidka si marka kale keligiis ama baaskiil ugu yimaado.

- Ka warqab marwalba in uu ilmahaada shaqada guriga uu sameeyo uuna diyaarsado boorsadiisa iskuulka maalinta ku xigta.

- Ku kalsoonow ilmaha kartidiisa xaga waxbarashada ah una ogoloow waxyaalo badan in uu isaga sameeyo.

- Ku amaan ilmaha marwalba kartida dheeraadka ah ee uu ka muujinaayo xaga waxbarashada iyo culeyska ku sii kordhaayo ee la xiriirta xaga waxbarashada.

- Haku ciqaabin ama haku liidin qalad uu sameeyey dartiis, u wajaha qaladkaas si wadajir ah si aad u saxdaan si adiga kaaga barto ama daydo in qaladka la awoodo in la saxo.

Afka ama luqada iyo adiga khibrada aad u leedahay way caawineysaa caruurta.

- La hadal ilmaha markuu yaryahay laga bilaabo sidii qof weyn oo kale, ugana sheekeey waxa adiga waqti xaadirkaan sameyneysid ama qabaneysid uguna sheekeey aduunka anaga nagu soo hareereysan, si fiican oo dhegan u dhageyso wuxuu kuu sheegaayo ilmaha uguna jawaab su,aalihiisa ugu sheekeey sheekooyinka caruurta ama uga akhri buug.

- Sameeya waxwalba idinkoo u wada dhantihiin qoys ahaan tusaale ahaan geey caruurtaada meelaha duurjoogta lagu xanaaneeyo, ku orodka barafka La raac Markab (Doonyi weyn), madxafyada iyo weliba in aad isla soo lugabaxsataan. Taasi waxay u horseedeysaa in uu yaraantiisiiba ilmaha fahmo waxyaalo badan iyo sidey isugu xiranyihiin.

- Booqda marwalba uu waqtigu idiin saamaxo meelaha buugaagta lagu keydiyo (laybereri). Kuna dhiirigeli akhrinta buugaag badan.

Caruurta ku barbaareysa luqado badan:

- Kula hadal ilmaha afkaada hooyo ama luqad adigu si fiican u taqaanid xataa haddii uu kuugu jawaabaayo luqada meesha aad joogtaan loogu hadlo.

- Ku dadaal in uu ilmahaada yaraantiiba barto afka-Jarmalka ama afka-Faransiiska adigu baro naftaada afafkaas una noqo caruurtaada hogaamiye fiican ama macalin oo waxbadan ilmaha kaga daydaan.

- Ku soo qor ama geey iskuulaadka ay jaaliyadaha iska leeyihiin ee lagu barto afkaada hooyo (af-soomaaliga) iyo weliba dhaqanka. Taasi waxay udub dhexaad u tahay in uu si fiican u barto luqadaha ama afafka kale eeajnabiga.

Kaga bogo wixii intaa dheer ee faafaahin ah kuna saabsan ku barbaarinta caruurta luqado badan: www.erz.be.ch/hsk

Isticmaalka aaladaha cusub.

Isticmaalka aaladaha cusub sida kombuyuutarada, iyo internetka, telefoonada gacanta lagu qaato, email, meelaha ama qolalka lagu sheekeysto sida (Paltalk, Chatroom), ciyaaraha, feisbuuga (facebook) yuutubka (youtube) iwm waxaa ku jira waxyaalo badan oo caruurta iyo dhalinyarada u noqdey shaqo joogto ah oo si xawli ah u isticmaalaan oo marka dambe cudur isu bedela ama balwad xun sida sigaarka oo kale amaba ka sii daran, laakiin waayo aragnimada waxay na tuseynaa isticmaalka khaldan

caruurtu waxay u horseedeysaa mushkilad tasoo ah in marwalba uu ilmuhu fadhiyo internetka, oo waxyaalo xun xun ka barto sida Bornogarafiyada iyo is maquuninta ama awood isku sheegashada (kufsiga) ama xatooyada sidaa daraadeed waalidka ayaa waajib ku tahay in uu caruurtiisu uu baro habka fiican ee aaladaha cusub loogu faa, iideysto.

- Ha dhigin kombuyuuterka iyo telefishinka qolka caruurtu seexato, ee dhig meesha qoyska oo dhan ay wada joogaan sida qolka fadhiga ama barandada.

- Haddii uu ilmahaada xiiso dheeri ah u hayo internetka u ogolow in uu ku tuso ciyaaraha uu halkaa ku cayaaro ama barta uu internetka ee uu booqdo.

- La gal caruurtaada heshiis cad ama balan adag oo ku saabsan aalada cusub iyo isticmaalkeeda iyo weliba wixii laga sameyn lahaa haddii uu jebiyo heshiiska tusaale ahaan imisa saacadood maalintii ama usbuucii uu ku cayaari karo ama booqankaro internetka iyo borogaraamada aad u ogoshahay in uu fiirsado ama ka daawado telefishinka.

- Ka feejignaaw da,da caruurta loo ogolyahay telefishinka iyo ku cayaarida kambuyuuterka.

- Ku caawi caruurtaada ama ku dhiirigeli in waqtigiisa uu la qaato qoyska ama caruurta isga la da,ah iyo weliba ku cayaarida banaanada sida kubadda oo kale.

Talo iyo tusaale ku aadan isticmaalka aaladda cusub ayadoo luqado badan ku qorantahay booqo barta internetka ee cinwaankeedu yahay:
www.migesplus.ch > Kind und Gesundheit
www.sucht-info.ch > Elternbrief 8
www.cybersmart.ch

8 Erey bixin.

Degmada
Gemeinde / *Commune*
Degmada waxay u xilsaarantahay abaabulka ama isku dubaridka xanaanooyinka iyo iskuulada dugsiga hoose/dhexe waxayna diyaarisaa waxyaalaha loogu baahanyahay iskuulka sida dhismaha iskuulka kuraasta miisaska buugaagta haddii aad u baahantahay waxbixino intaa ka dheer booqo barta internetka ee degmada ama iskuulka ama weydii xafiiska degmada.

Kuwo ku Taqaqusey arima Bulshada iskuulka
Schulsozialarbeit / *Médiation scolaire*
Dhexdhexaadiyaalka iskuulka waxay hiil iyo hooba la garab istaaganyihiin caruurta iyo dhalinyarada ayna waxkasta xal u helaan, ama talo ka siiyaan sida waxyaalaha ku saabsan bulshada ama shaqsiyan.
Waxay kaloo talosiin ula diyaar yihiin macalimiinta iyo waalidka.

Gudiga iskuulka
Schulkommission / *Commission scolaire*
Gudiga iskuulka waxay ilaaliyaan ama dhowraan xuquuqda caruurta sharciga gobolka u yaala xaga caruurta iyo waxay kaloo ilaaliyaan degmada sida ay u maamusho xanaanooyinka iyo dugsiyada hoose/dhexe iyo weliba go,aanada wax ku, oolka ah ee iskuulka gaarayo.

Gudoomiyaha waxbarashada iyo barbaarinta
Erziehungsdirektion / *Direction de l'instruction publique*
Gudoomiyaha waxbarashada iyo barbaarinta waa hay,ad dowli ah una qaabilsan gobolka xaga waxbarashada waxay dejiyaan sharciyada ay ku shaqeeyaan xaanooyinka caruurta iyo dugsiyada hoose/dhexe ee degmooyinka uu gobolku ka koobanyahay iyo weliba muqararka sanaddugsi-yeedka.

Macalinka ama Macalinka Mas,uulka ah
Klassenlehrperson / *Maître ou maîtresse de classe*
Mas,uulka fasalka ama kaabogalaaska waa macalinka u qaabilsan fasalkaas xaga waxbarashada iyo isku dubaridka hawsha fasalka waana afhayeenka fasalka waana qofka koowaad ee marwalba aad la hadleysid waxwalbana kala tashaneysid markey noqoto su,aalaha ku saabsan xanaanada ama iskuulka caruurtaada ay dhiganayaan.

Kormeerayaasha iskuulka
Schulinspektorat / *Inspection scolaire*
Kormeerayaasha waxay kormeeraan xanaanooyinka iyo iskuulada hoose/dhexe ee gobolka

Goobta Latalinta Shaqo ama Mihnad barashada
Berufsberatung / *Orientation professionnelle*
Lataliyayaasha qibrada Mihnad shaqo barashada waxey Dhalinyarta iyo Dadka waa weynba ku caawiyaan wargelin iyo la talin sida loo kala doorto midnada ku haboon qofkaas ama Kororsiga wixii aad horey u taqiin. Waxey u shaqeeyaan Beeleo beelo ama qayb a mid ah Gobalka halkaas oo ay talo ka xixiyaan oo ku saabsan shaqada. Waxaa loo soo gaabiyaa (BIZ / centre OP).

Maamulaha iskuulka
Schulleitung / *Direction d'école*
Maamulaha asaga ama ayada ayaa ka mas,uul ah habka waxbarsha iskuulkaas. Ayada ama Asaga ayaa Caruurta u kala qaybiyaa (u kala diraa) fasalada ay kala tagayaan mas, uuliyada go, aameedna oo iskuulka ku saabsan ayagaa ka mas,uul ah.

Waa Maqnaanshaha ama Fasax Dalabka Caruurta loogu Qaado iskuulka.
Dispensationen / *Dispenses*
Waa dalab fasax ah oo waxtigaa ka hor lays ku diraariyay lana qorsheystey marka fasaxaas ama maqnaanshaas waxaa loo weydiistaa ama loo dalbado waa inaad warqad u qorataa Maamulaha.

Maqnaansho sabab la, aan
Absenzen / *Absences*
Maqnaansho laga maqnaado iskuulka (xiisada) sabab la, aan.

Mutacalim ama qof wax khaas ah ku taqasusey
Fachperson / *Spécialiste*
Mutacalimku waa qof wax khaas ah ku takhasusey. Macalinku ama macalimadu waa mutacalim ku takhasusey waxbarasho gaar ah iyo in uu wax sii bari karo mutacalimiinta kale waxay macalimiinta iyo ardayda iyo waalidkaba ka caawiyaan waxbarashada iyo barbaarinta tusaale ahaan mutacalimiinta ku xeel dheer in ay talo kaa siiyaan xaga barbaarinta ama kuwa qaabilsan iskuulada ee xaga saaykoolojiyada ama ku qaabilsan xaga talosiinta ku aadan shaqada.

Talosiin ku aadan xaga barbaarinta
Erziehungsberatung (EB)
Service psychologique pour enfants et adolescents (SPE)
Lataliyaasha qibrada leh ee ka shaqeeya xarunta latalinta xaga barbaarinta waxey lataliyaan Reerka (Familka) Caruurta iyo Dhalinyarta kuwaas oo xaalad dhib leh ku jira waxey raadkeeda raadinayaan Sababta keentay dhibka ka taagan waxbarasho xumida (ilmaha oo aan wax qaban karin) lataliyaasha qibrada leh ayaguna waxay u shaqeeyaan laan laan ama Beel beel.waa Goobta latalin ee xaga barbaarinta.

Impressum

Kindergarten und Volksschule im Kanton Bern
Informationen für Eltern (Ausgabe 2012)
Sprache: Somali

Herausgeber
Erziehungsdirektion des Kantons Bern
Amt für Kindergarten, Volksschule und Beratung
www.erz.be.ch/akvb, akvb@erz.be.ch

Keine Printausgabe.
Download: www.erz.be.ch/elterninfo

Quellennachweis Bilder
Die Bilder sind urheberrechtlich geschützt.
Alle Bilder ausser Seite 1:
Christoph Heilig | www.foto-heilig.ch
Seite 1: zvg